

## OFFICIAL

Dadka degan  
12 Holland Court iyo 120 Racecourse Road  
FLEMINGTON

Mudanaha/Marwada guriga degan

Waxaan qoraalkan kuugu soo qoraynaa in aan kula socodsiino halka ay marayaan howlihii Guryo Dhisida ee Homes Victoria iyo barnaamijka dib u dhiska saraha dhaadheer.

Marxaladdii xigtay ee barnaamijka ayaa hadda ka socota 7 goobood oo cusub. Taasi micnaheedu waxay tahay inay hada meel fiican noo marayaan dhisida aan 9 xaafadood uga dhiseyno guryo loogu talagalay dadka meesha degan hada iyo kuwa mustaqbalka soo degi doonaba guryahaas oo noqon doona kuwo ka fiican, ka amni wanaagsan iyo kana raaxo badan guryihii hore.

### Waxyaabaha maanta lagu dhawaaqay?

Maanta, waxaan dadka guryaha degan kala hadalnay dib u dhiska lagu sameynayo dhismayaashan:

- 25 iyo 27 King Street, Prahran
- 150 Inkerman Street, St Kilda
- 150 Victoria Avenue, Albert Park
- 159 Melrose Street, Waqooyiga Melbourne
- 29 Crown Street, Flemington
- 94 Ormond Street, Kensington

Waxaan si joogto ah ula xiriireynaa dadka degan dhismayaashan, laga bilaabo **bisha Luulyo 2026 ilaa bisha Febraayo 2028**, iyadoona aan si dhow ula shaqeyn doono qoysaskan si aan uga caawinno inay u guuraan guri ku habboon.

### In lagaa caawiyo guuritaanka

search **homes victoria**



[homes.vic.gov.au](https://homes.vic.gov.au)

Waxaan hadda caawimaad siinaa adiga iyo tiro yar oo ah qoysas wali ku haray 12 Holland Court iyo 120 Racecourse Road si aan u qorsheyno guuritaankooda.

**Haddii aad hadda wali qorsheynayso inaad go'aan ka gaarto dalab guri oo lagu soo bandhigay,** waxaan kugu dhiirigelineynaa inaad kooxda u qaabilsan howlaha dib-u-dejinta ugu sheegto go'aankaaga sida ugu dhakhsaha badan.

**Haddii lagu soo bandhigay guri cusub,** hadda ayaa la joogaa waqtigii aad nala wadaagi lahayd maalinta aad guurayso.

## **Xasuusnoow**

**Xuquuqda aad leedahay waxba iskama badelayaan.** Gurigaaga cusub waxaad weli kusii heli doontaa xuquuqdii iyo xaq-dhowrkii aad hore u lahayd oo kale sida uu dhigayo Sharciga Kiraystayaasha Residential Tenancies.

**Caawinta lagaa caawinayo guuritaanka.** Waxaan kuu diyaarin doonaa dad alaabta kuu rara, kaa caawiya inaad xirxirato kabacdina kuu kala furfura hadii loo baahdo, kuu diyaariya in wax kasta lagu soo xiro sida taleefanka, internetka iyo waraaqaha boostada oo lagu soo wareejiyo sidoo kalena bixiya dhammaan kharashaadka ku baxaya howlaha guuritaanka intii macquul ah. Waxaan sidoo kale kaa caawin doonaa in la tuuro wixii aadan u baahneyn inaad qaadato.

**Soo noqoshada.** Marka la dhameystiro howlaha dib-u-dhiska waxaad ku noqon kartaa xaafadaada iyadoona wax kasta lagu salaynayo baahidaada markaas taagan, sida aad ugu qalanto iyo in uu guriga cusub yahay mid kugu haboon.

## **Xaafadaada dhexdeeda**

Inta aan isu diyaarinayno inaan bilowno burburinta, waxaan sidoo kale ka fiirsaneynaa ra'yiga dadka deegaanka ee ku aadan waxa ay jeclaan lahaayeen in ay guryaha cusub lahaadaan. Aragtida fog ee aanu leenahay waa guryo cusub oo tayo leh oo ku yaal xaafad si fiican loo nashqadeeyey iyo xaafado si fiican iskugu wada xiran.

Dhanka kale, guryaha cusub iyo xarumaha bulshada ee ku yaal dhismaha cusub ee Holland Court ayaa la filayaa in la dhammaystiro sanadkan, waxaana dhawaan idinla wadaagi doonaa naqshadaha barxada weyn (5000 square metre) ee central park, ee sidoo kale la filayo in la dhammaystiro sanadkan.

Mahadsanid

**Simon Newport**

Madaxa Fulinta  
ee Homes Victoria

28/01/2026

search **homes victoria**



[homes.vic.gov.au](https://homes.vic.gov.au)

